

# Ku socota dhamaan dadka waaweyn

## – waa in aan hadda gacan qabanaa carruurta

Sababo la xidhiidha cudurka uu sababo fayruuska Corona (Coronaviruset) waxaa qasab ku noqotey carruur iyo dad waaweyn oo badan in joogaan gurigga kuwaas oo aan sida caadiga ah hore u wada joogi jirin gurigga muddo sidaa u badan. Waxaa aan ognahay in tani ay gacan ka gaeysan doonto in ay carruur badan la daristo marxalad gaar ah oo qalafsan.

Sidaa aawadeed dadka waaweyn ee ku xeersan carruurta waxaa looga baahanyahay in ay isa saaraan mas'uuliyad dheeri ah isla markaana ay fiiro gaar ah u yeeshaan carruurtaas.

Waxaa ay noqon karaan carruur dariskaaga ah, carruur ay dheleen asxaabtaadu ama carruur uu dhaley qof dhigaaga ah. Waxaa kale oo dhici karta in ay noqoto in aad maqasho wadahadal kugu abuura welwel oo aad la yeelato dad waaweyn ama carruur wakhtiyada aad gudaneyso hawlahaag xirfadeed ee ay bulshadu kuu igamatey.



### Haddii aad ka welwelsantahay in carruur loo geystey jidh dil, la dayacey ama siyaabo kale la il daran:

- 1** Waxaa loo baahanyahay in aad wargeliso hay'ada adeega daryeelka bulshada (socialtjänsten). Fadlan ka akhri macluumaad dheeri bogga internetka ee degmada sida loo gudbiyo dacwadaas haddii uu shaki jiro sida loo sameeyo dacwada. Uma baahnid in aad wax ka **ogaato** xaalada rasmiga ah ee uu ilmuhu ku suganayahay, kaliya waxaa kugu filan **in uu ku galo dareen** welwel ah.
- 2** Fadlan la hadal ilmaha! Ka wareeyso sida ay taahay xaaladiisu marka uu ku suganyahay gurigga. U sheeg waxa ay sameyn karaan carruutu lacala ay ku dhacaan waxyaabo cabsi galin kara. Fadlan u sheeg carruurta in aysan marnaba aheyn qaladka carruurta in dadka weyn ay waxyeelo u geystaan carruurta ama ay si xun ula dhaqmaan.
- 3** Fadlan wac hay'ada nabadgelyada ciidanka booliiska! Haddii ay jirto xaalad degdeg ah ama xaalad khatar ah – fadlan wac booliiska 112.

Waxaa xitaa qof weyn ahaan aad wici karaan hay'ada BRIS lambarka telefoonka å 077-150 50 50 haddii aad qabto welwel in ilmo yar dhibaateysanyahay iyo waliba Kvinnofridslinjen lambarka telefoonka 020-50 50 50 si aad u hesho macluumaad ku saabsan meelaha aad ka heli karto taageero iyo caawimaad.

**Xasuunow in:** Dhlinyarada iyo dhalaanka marka ay ku suganyihiin gurigga waxaa ay wakhti badan galiyaan ama ku jiraan shabakada internetka, taas oo keeni karta halis ah in loogu gaeysto xadgudub. Sidaa aadeed waxaa haboon in lagala hadlo carruurta arinkan! Fadlan weydii waxyaabaha ay kala kulmaan shabkada internetka.

### Waa waajib saarn dadka waaweyn in carruurta dareemaan xasilooni



VKV – Västra Götalandsregionens kompetenscentrum om våld i nära relationer  
Gobolka Västra Götaland  
xarunta aqoonta rabshadaha ee xidhiidhka



En förening som verkar för att alla ska få  
leva i hem fria från rädsla och våld.  
Jaaliyad ka shaqeysa in qof walba uu helo  
ku noolaado guryo aan lahayn cabsi iyo rabshado